

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Nofeembar 2024 ayaa gaaray 152.46, marka la barbardhigo 151.96 bishii Oktoobar 2024.

Isbedel bileedka, Nofeembar 2024, marka la barbar dhigo Oktoobar 2024, ayaa hoos u dhacay 0.33 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa **Gaadiidka** (2.55 boqolkiiba) iyo **Isgaarsiinta** (2.16 boqolkiiba). Sare u kaca **Gaadiidka** ayaa inta badan ka yimid qiimaha lagu iibsado baabuurta (+5.81 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ee **Isgaarsiinta** ayaa ka yimid qiimaha telefoonada iyo qalabka telefax (+2.47 boqolkiiba).

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Nofeembar 2023 iyo Nofeembar 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.20 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.83 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Oktoobar 2023 iyo Oktoobar 2024.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Nofeembar 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Nofeembar 2024	
Tusaha bishan (Nofeembar 2024)	152.46
Tusaha bishii hore (Oktoobar 2024)	151.96
Tusaha sanadkii hore (Nofeembar 2023)	144.92
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.33%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.20%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 bilood.

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiya, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Nofeembar 2024

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Nofeembar 2024

Heerka sicir-bararka bisha Nofeembar 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Nofeembar 2023 iyo Nofeembar 2024.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.20 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Nofeembar 2023 iyo Nofeembar 2024, marka labar bardhigo 5.93 boqolkiiba 12kii bilood, Oktoobar 2023 iyo Oktoobar 2024.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Nofeembar 2024 ayaa sameeyey sare u kac dhan 0.33 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Nofeembar 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada** iyo **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -0.46 boqolkiiba, bishii Nofeembar 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -2.72 boqolkiiba bishii Nofeembar 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 0.60 boqolkiiba Oktoobar 2024.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sare ukac bille ah sameeyey 0.96 boqolkiiba ee bishii Nofeembar 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 0.39 boqolkiiba Nofeembar 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo hoos u dhaciisu gaaray -3.05 boqolkiiba Oktoobar 2024.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay.

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

War bixin bileedka bisha *Nofeembar 2024* (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Nofeembar 2024(Dec 2014 = 100



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):


- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 79.14 boqolkiiba bishii Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+100.18 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 33.44 boqolkiiba bishii Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+46.00 boqolkiiba).
- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 31.61 boqolkiiba Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Macluumaadka oo u gaaray (+35.29 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 24.05 boqolkiiba Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+24.43 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+92.30 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 22.62 boqolkiiba Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Agabka Guriga iyo Farsamadooda, Rogaga iyo Daboolka kale ee Dabaqa (+27.70 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 21.92 boqolkiiba Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu iibsado Gawaarida oo gaaray (+34.34 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 20.51 boqolkiiba Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha saameeyey shaqsiyada oo gaaray (+21.84 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa la diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 2.84 boqolkiiba, bishii Nofeembar 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Adeega Caafimaadka (+20.00 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Nofeembar 2024 (-)

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -16.08 boqolkiib bishii Nofeembar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada (- 30.77 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey hoos u dhac sanadle ah -5.72 boqolkiiba bishii Nofeembar 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha warbarashada ee dugsiga sare ka danbaysa (- 12.50 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa ladiwaangaliyey hoos u dhac sannadle ah -2.72 boqolkiiba Nofeembar 2024. Hoos u dhaca u badan ayaa ka yimid qiimaha Cuntada (-2.72 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee qeybaha kala duwan ee saameeya isbedelka bilaha ah ee TSB –da
Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Nofeembar 2024
(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Octoobar 2024(+)

- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 2.55 boqolkiiba Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu iibsado Gawaarida oo gaaray (+5.81 boqolkiiba)
- **Isgaarsiinta** ayaa ladiwaangalyey sare u kac Bille ah 2.16 boqolkiiba bishii Nofeembar 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+2.47 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 2.16 boqolkiiba Nofeembar 2024. saer u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha saameeyey shaqsiyada oo gaaray (+3.91 boqolkiiba).

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay(-)

- Majirin hoos u dhac lataabankaro bishii Nofeembar 2024.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Nofeembar 2024 ee habka (COICOP)

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Nofeembar 2023 TSB	Oktoobar 2024 TSB	Nofeembar 2024 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha TSB-da	100.00	144.92	151.96	152.46	0.33	5.20
Cuntada & Cabitaanada	46.04	144.56	141.28	140.62	-0.46	-2.72
Tubaakadda	1.25	168.67	141.55	141.55	0.00	-16.08
Dharka & Kabaha	5.03	169.52	209.57	210.29	0.35	24.05
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	144.35	143.53	144.92	0.96	0.39
Agabka Guryaha	2.93	118.10	144.12	144.81	0.48	22.62
Caafimaadka	5.00	182.78	188.84	187.98	-0.45	2.84
Gaadiidka	3.77	122.04	145.10	148.80	2.55	21.92
Isgaarsiinta	2.80	166.78	292.46	298.78	2.16	79.14
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	104.30	134.77	137.26	1.85	31.61
Tacsiinta	4.00	116.95	109.75	110.26	0.47	-5.72
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	150.45	200.03	200.76	0.36	33.44
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	120.63	142.31	145.38	2.16	20.51

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Diseembar, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Janaayo, 2025. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Nofeembar 2024 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia